



Waa maxay Fremdenpass?

Fremdenpass waa dukumeenti safar oo la siiyo muwaadiniinta ajnabiga ah ee si sharci ah ugu nool Austria, balse aan haysan karin ama heli karin baasaboorka dalkooda hooyo. Waxa uu qofka u oggolaanayaa inuu si sharci ah ugu safro dibadda, iyadoo la raacayo shuruudaha fiisaha iyo gelitaanka ee dalka la doonayo in la booqdo.

 Fremdenpass-ku wuu shaqeeyaa dunida oo dhan, marka laga reebo dalka uu qofku asal ahaan ka soo jeedo.

 Dadka haysta magangalyo buuxda (Asylberechtigte) ma helaan Fremdenpass, balse waxay dalban karaan Konventionsreisepass, kaas oo ah baasaboorka qaxootiga.

Yaa heli kara Fremdenpass?

Xaaladaha qaarkood, dadku waxay xaq sharci ah u leeyihiin in Fremdenpass loo siiyo. Kooxahan hoos ku xusan waxay si rasmi ah u dalban karaan:

1. Dadka haysta ilaalin kumeel-gaar ah (Subsidiär Schutzberechtigte)

Haddii aysan awoodin inay ka helaan baasaboorka dalkooda hooyo, waxay guud ahaan xaq u leeyihiin Fremdenpass.

Kaliya haddii aysan jirin walwal amni oo culus, ayaa codsiga la diidi karaa.

2. Dadka aan waddan lahayn (Staatenlose)

Qofka aan lahayn dhalasho (citizenship) oo aan heli karin baasaboorka rasmi ah, wuxuu xaq u leeyahay Fremdenpass, haddii uu si sharci ah Austria ugu nool yahay.

3. Dadka haysta deggenaansho joogto ah – Daueraufenthalt-EU

Fremdenpass waa la siin karaa haddii:

Dalka hooyo uusan bixin baasaboor, iyo

Ay jiraan duruufo shaqsiyeed oo muujinaya in Fremdenpass-ku lagama maarmaan ama waxtar leeyahay, sida:

- baahi shaqo,
- mas'uuliyado qoys,
- nolol iyo xiriir dheer oo Austria ah.

✦ Deggenaansho joogto ah waxa si rasmi ah loo aqoonsanayaa marka qofku haysto Daueraufenthalt-EU.

Kooxo kale:

Sharcigu wuxuu oggol yahay in kooxo kale ay dalban karaan Fremdenpass, kaliya haddii bixintiisu ay ku jirto "danta Austria", taas oo micnaheedu yahay xaalado aad u gaar ah oo aan caadi ahayn.

⚖️ Maxkamadda Dastuuriga (VfGH) waxay sheegtay in:

Adeegsi aad u adag oo sharciga ah uu jebin karo xuquuqda xorriyadda safarka (Qodobka 2aad, Borotokoolka 4aad ee Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Yurub – EMRK). Sidaas darteed, kiis kasta waa in si gaar ah loo qiimeeyaa, si loo hubiyo in xuquuqdaas aan la jabin.

! Si kastaba ha ahaatee, VfGH si weyn uma ballaarin dadka xaqa u leh Fremdenpass. Taas macnaheedu waa in dadka haysta:

- Aufenthaltsberechtigung (plus) sida ku cad §55 AsylG,
- Rot-Weiß-Rot-Karte (plus),
- ama dadka ka soo qaxay Ukraine (Vertriebene),

👉 hadda aysan heli karin Fremdenpass oo loo ogoleyn.

Caddeynta in aan la heli karin baasaboorka dalka hooyo

Fremdenpass waxaa la bixiyaa kaliya haddii la caddeeyo in:

- Baasaboor laga heli karin dalka hooyo.

Gefördert durch:


Caadi ahaan, tan waxaa lagu caddeeyaa:

- warqad rasmi ah oo ka timaadda safaaradda ama qunsuliyadda dalkaas.

Caddeyn looma baahna haddii:

- Austria aysan ka jirin safaarad ama qunsuliyad dalkaas,
- la ogyahay in safaaraddaasi aysan bixin baasaboorro,
- ama khatarta keentay in qofku helo ilaalin ay ka timid dowladda lafteeda, ama
- dowladdaasi aysan diyaar u ahayn inay qofka ilaaliso (cadaadis dowladeed ama ilaalin la'aan).

Halkee ayaa Fremdenpass laga dalbadaa?

Fremdenpass waxaa laga dalbadaa:  Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl (BFA).



Terminvereinbarung

- Qofku waa inuu si shaqsi ah u yimaadaa.
- Codsiga waxaa lagu gudbin karaa xafiis kasta oo BFA ah, taas oo kordhinaysa fursadaha ballan.
- [Ballan online](#) ah ayaa la qabsan karaa.
- Haddii ballanta online lagu qabsado, looma baahna in foom horay loo buuxiyo.
- Fremdenpass-ka:
- laguma qasbana in si shaqsi ah loo soo qaato,
- waxaa laguugu soo diri karaa boosto.

Kharashka Fremdenpass

€ 112 – dadka 12 sano jirka ah iyo wixii ka weyn

€ 44 – carruurta ka yar 12 sano

Carruurta ka yar 2 sano:

 baasaboorkoodii ugu horreeya waa bilaash

Gefördert durch:

 Bundesministerium
Arbeit, Soziales, Gesundheit,
Pflege und Konsumentenschutz

asylkoordination
österreich

Bogga **3** ka mid ah **4**



Talooyin waxtar leh oo ku saabsan codsiga

- ✓ Hubi inaad ka mid tahay kooxaha xaqa u leh.
- ✓ Soo ururi caddeyn muujinaysa inaad heli karin baasaboorka dalkaaga.
- ✓ Diyaari dukumeentiyada aad u baahan tahay, una soo qaado ballanta:

Caddey aqoonsi iyo oggolaansho deggenaansho

Haddii ay jiraan:

shahaadada dhalashada, shahaadada guurka ama Isqabidda

Fremdenpass hore (haddii aad haysatay – waa la burinayaa)

Ama warbixin ku saabsan lumis ama xatooyo

- ✓ Ballan ka qabso BFA.
- ✓ Ha illoobin: sawirka baasaboorka, lacagta khidmada.

? Yaa kaa caawin kara haddii aad su'aalo qabto?

Haddii aadan hubin inaad shuruudaha buuxinayso ama aad qabto su'aalo


👉 waxaad la xiriiri kartaa [xarumaha talo-bixinta](#) ee arrintan ku takhasusay.



Beratungsstellen

🔍 Macluumaad cusboonaysiin joogto ah oo ku saabsan Fremdenpass, iyo suurtagalnimada in su'aalo online ah la weydiiyo, waxaad ka heli kartaa madasha [Kompetenznetzwerk Asyl](#).

Gefördert durch:

 Bundesministerium
Arbeit, Soziales, Gesundheit,
Pflege und Konsumentenschutz

asylkoordination
österreich

Bogga 4 ka mid ah 4